JAMHUURIYADDA SOMALILAND

WASAARADDA HORUMARINTA MAALIYADDA

MIISAANIYADDA MUWAADINKA

SOMALILAND

EE 2020



KELMADDA WASIIRKA

Ka dib dhawr sannadood oo adkaa, dhaqaalaha Somaliland waxa uu hadda yahay mid soo kaban-aya. Siyaasadaha dawladda ayaa ka qayb qaatay in qiimayaashu halkii u hooseysey yimaaddaan muddo laba sannadood ah, qiimaha lacagteeniina kor u soo kaco.

Koritaankii ayaa dib madaxa ula soo kacay, mudda ganacsiguna waa xoogeystey taas oo suurtagelisey in dawladda Somaliland u hirgeliso muwaadiniinnta mashaariic iyo adeegyo.

Waxa kale oo horumarradanu ku suurtagaleen iyada oo dib-u-habaynno lagu sa-meeyey sida loo maareeyo maaliyadda dawladda.

Miisaaniyadda 2020 waxa ay u diyaarisey taageero dheeraad ah meelaha uu mu-waadinku uga baahan yahay mudnaan-siinta sida: Adkaynta ammaanka, sii-xoojin-ta koboca dhaqaalaha, iyo horumarinta tayada adeegyada waxbarashada iyo caafimaadka.

Wasaaraddaydu waxa kale oo ay la iman doontaa hal-abuur ka dhigaya Somaliland mid tartami kara iyada oo cashuuruha laga dhigi doono kuwa fudud oo caddaali ah.

Waxa intaa dheer in dawladdeennu ay hubinayso in bixinta adeegyadu ahaadaan kuwo si siman loo helo oo laga wada muuqdo: gobol iyo degmo kasta oo Somalil-and ahi waxa ay heli doonaan khayraadka ku habboon oo caddaali ah si loo badhita-aro koboca dhaqaale ee la wada leeyahay. Muwaadiniinta Somaliland oo dhammi waa inay ka wada faa'iidaan isla markaana ka wada qayb qaataan ka-midho-dhalin-ta ballaanqaadyada iyo guddoonnada la galay.

Sidaa darteed, farxad ayay ii tahay inaan idiin soo gudbiyo ahmiyadda Miisaani-yadda Muwaadinka ee 2020.

MAXAYNU UGA JEEDNAA MIISAANIYAD?

Miisaaniyaddu waa qorshaha maaliyadeed ee sannadlaha ah ee dawladdu u diyaariso qaranka. Waxa ay muujisaa sida dakhliga loo soo saarayo, iyo sida dakhligaa loo isticmaalayo si loo daboolo baahiyaha kala duwan ee muwaadinka iyo Dhaqaalaha. Miisaaniyaddu waxa ay soo koobtaa, si la taaban karo u hirgelisaa, fulinta waajibaadka dawladda iyada oo, isla mar ahaantaa ah, aalad ama tab muwaadinku dawladdiisa kula xisaabtami karo.

Miisaaniyaddu waxa ay dawladda ka caawisaa kala-horraynsiinta baahiyaha kala duwan ee dalka – haddii ay tahay xoojinta dhaqaalaha, adkaynta nabadgelyada iyo horumarinta nolosha – iyada oo hubineysa in wasaaradaha, waaxaha iyo wakaaladaha mas'uuliyadaha ku lihi helaan hantidii ay u baahnaayeen.

WAA MAXAY HANNAANKA DIYAARINTA MIISAANIYADDU?

- **May** – Wasaaradda Maaliyaddy waxay diyaarisaa xaashida odoroska miisaaniyadda
- **Jun** – Wasaaradda Maaliyaddu waxay diyaarisaa Haykalka Dhaqaalaha Guud ee Maaliyadeed
- **Jun-Jul** – Wasaaradda Maaliyaddu waxa ay la tashataa Guddiga Diyaarinta Miisaaniyadda
- **Jun-Jul** – Wasaaradda Maaliyaddu waxay la tashataa hay'adaha Dawladda
- **Jun-Jul** – Wasaaradda Maaliyaddu waxay talogelisaa Baarlamaanka
- **Aug** – Wasaaradda Maaliyaddu waxay ku wargelisaa Wasaaradaha, Hay'adaha, Wakaaladaha iyo Dawladaha hoose inay soo diyaarsadaan miisaaniyadahooda
- **Aug** – Wasaaradaha iyo wakaaladaha dawladda ayaa diyaarsada soona gudbiya miisaaniyadahooda
- **Sept** – Wasaaradda Maaliyaddu waxay doodo kala yeelataa wasaaradaha iyo wakaaladaha miisaaniyadaha ay soo gudbisteen
- **Sept** – Wasaaraddu waxa ay u gudbisaa miisaaniyadda Golaha Wasiirrada oo wax-ke-beddel iyo oggolaanshoba ku samayn kara
- **Oct** – Wasaaradda Maaliyaddu waxa ay miisaaniyadda la soo oggolaadey u gudbisaa Baarlamaanka oo wax-ka-beddel ku samayn kara inta aanu oggolaan
- **Nov - Dec** – Madaxweynaha ayaa saxeexa Miisaaniyadda si loo fuliyo
- **Jan** – Wasiirka Maaliyaddu waxa uu u kala diraa wareegto wasaaradaha iyo wakaaladaha si ay u fuliyaan miisaaniyadda
- **Jan-Dec** – Wasaaradaha iyo Wakaaladaha Dawladdu waxa ayu fuliyaan miisaaniyadda
- **Jan-Dec** – Wasaaradda Msaaliyaddu waxa ay oggolaata waarannada kharashgalka ee wasaaradaha iyo wakaaladaha
- **May-Jun** – Hantidhawrka Guud waxa uu baadhaa miisaaniyadda dhammaadka sannad-maliyadeedka

WAA MAXAY MIISAANIYADDA 2020?

Dawladda Somaliland waxa ay ku talo jirtaa in la kharashgareeyo SlShs 2.046 tirilyan sannadka 2020 (oo aanay ku jirin deeqaha caalamiga ahi), taas oo u dhiganta korodhsiimo dhan SlShs 263.846 billion, oo la mid ah 14.8% marka loo eego Miisaaniyaddii 2019. U-kala-qoondaynta loo samaynayo Wasaaradaha, Waaxaha iyo Wakaaladaha ee hantidu kama tarjumeyso oo keli ah ka-la-mudnaanta muddada dhow balse waxay, sidoo kale muujineysaa yoolka muddada dhexe iyo muddada dheer ee dawladda sida ku cad Qorshaha Horumarinta Qaranka II (NDPII) iyo Fogaan-eegga Qaranka ee 2030.

Waxa la filayaa in deeqaha Bangiga Adduunka ee 2020 ay noqdaan SlShs 45.05 bilyan, oo u dhiganta korodhsiimo dhan 9.53% qoondadii 2019 oo dhammayd SlShs 41.21 bilyan.

SIDEE DAWLADDU WAX U KHARASHGAREYSAA SIDEESE UGU DHIGANTAA 2019?

Hantida dawladdu uga baahan tahay hirgelinta qorshayaasheeda sannadka 2020, waxa uu ka imanayaa cashuuraha iyo ilaha dakhliga ee kala ah:

Il Dakhli	SLSh in 2019	SLSh in 2020	% Faraqa	% Wadarta
Cashuuraha dakhliga iyo macaasha-macaashka	40,952,414,628	45,366,371,939	10.78%	2.22%
Cashuuraha mushahaarooyinka iyo shaqaalaha	40,952,414,628	93,307,587,842	-16.08%	4.56%
Cashuuraha agabka iyo adeegyada	492,425,922,802	557,278,424,539	13.17%	27.24%
Cashuurta ganacsiga caalamiga ah	809,846,028,537	989,541,311,981	22.19%	48.36%
Cashuuraha & dakhliyada kale	327,741,967,859	360,506,303,700	10.00%	17.62%
Wadarta Guud ee Dakhliga Qaranka	**1,782,154,460,000**	**2,046,000,000,000**	**14.80%**	**100.00%**
Dawladaha Hoose	255,490,228,023	326,748,574,181	27.89%	
Wakaaladaha madaxa bannaan	160,756,179,150	242,036,387,917	50.56%	
Deeqaha Caalamiga ah	135,919,596,078	136,519,918,000	0.44%	
Khayraadka/Hantida Guud ee Dawladda	**2,334,320,463,251**	**2,751,304,880,098**	17.86%	

SIDEE DAWLADDU UGU KALA QOONDAYSAA KHAYRAADKA WADAAGAYAASHA KALA DUWAN?

Miisaaniyadda 2020 waxa ay ugu kala qoondaysay qaybaha kala duwan sida uu kala-mudnaanta u siiyey Qorshaha Horumarinta qaranka II (NDP II)

QAYBTA	SLSh in 2019	SLSh in 2020	% faraqa	Qoondada Kharashgaraynta guud
Ammaanka/Nabadgelyada	657,025,835,791	709,512,317,712	7.99%	34.68%
Maamulka	342,266,545,784	391,938,588,527	14.51%	19.16%
Dhaqaalaha	277,048,930,634	344,344,067,555	24.29%	16.83%
Waxbarashada	150,270,542,188	196,847,233,514	31.00%	9.62%
Caafimaadka	90,268,550,602	96,528,054,269	6.93%	4.72%
Kale	85,742,250,520	96,009,113,469	11.97%	4.69%
Kaabayaasha	84,151,200,498	91,301,799,108	8.50%	4.46%
Waxsoosaarka	46,411,928,957	54,254,418,603	16.90%	2.65%
Biyaha & Faryodhawrka	17,529,490,644	28,819,080,788	64.40%	1.41%
Deegaanka	23,569,007,846	25,371,489,002	7.65%	1.24%
Tamarta	7,870,176,536	11,073,837,453	40.71%	0.54%
	1,782,154,460,000	**2,046,000,000,000**	**14.80%**	**100.00%**



SIDEE DAWLADDU U KHARASHGARAYSAA MIISAANIYADEEDA MARKA LOO EEGO QIIMAHA MADAXYADA?

KHARASHKA	2019	2020	% Faraqa	% Miisaaniyadda
Mushaharka Shaqaalaha	922,366,729,717	991,159,240,274	7.46%	48.44%
Kharshka Hawl-fulinta	463,139,075,825	535,720,823,610	15.67%	26.18%
Mashaariicda Dawladda oo ay ku jiraan hantida la taaban karo (physical)	229,415,263,658	330,430,545,316	44.03%	16.16%
Deynta	61,200,000,000	75,000,000,000	22.55%	3.67%
Lama-filaanka & Sanduuqa Kaydka Qaranka	59,800,000,000	66,100,000,000	10.54%	3.23%
Kabista	46,233,390,800	47,579,390,800	2.91%	2.33%
Wadar	**1,782,154,460,000**	**2,046,000,000,000**	**14.80%**	**100%**

WAA MAXAY KALA-MUDNAANSIINTA KHARASH-GALKA EE 2020?

AMMAANKA/NABADGELYADA

Adkaynta nabadgelyada muwaadiniinta Somaliland waxa ay ka mid tahay goobaha mudnaanisiinta u horraysa u leh dawladda. Miisaaniyadda 2020, iyada oo ka dhabaynaysa aragtidan, waxa ay kor u qaadaysa nolosha iyo qalabka Ciidamada Ammaanka. Waxa loo qoondeeyey qaybta ammaanka SlShs 709.5 bilyan, oo u dhiganta 34.6% Miisaaniyadda Qaranka, kana sarraysa 8% qoondadii 2019.

AMMAANKA/NABADGELYADA

Mashaariicda qorshaysan waxa ka mid ah :

• Dhismaha isbitaal ciidan, Saldhigga Ciidanka Milatariga Ceerigaabo, 7 rug bilays oo gobolada ah, 3 xabsi oo waaeyn oo kala ah Boorame, Gabiley iyo Sallaxley, rugo dabdemis oo kala ah Berbera iyo Laascaanood;

• Iibka 15 gaadhi-bilays iyo laba baabuur oo Wiish oyo Booyad ah si loo xoojiyo hawl-fulinta bilayska Gobollada;

• Kordhinta Ciidamada ammaanka;

• Ka-kordhinta Miisaaniyadda nabadsugidda qaranka 36.6% intii ay ahayd 2019 si loo ballaadhiyo awoodda ciidanka ee hawlqabadkiisa gudaha iyo dibeddaba;

CAAFIMAADKA



Horumarinta caafimaadka muwaadinku waxa uu ahmiyad u leeyahay badhaadhaha la wadaago ee qaranka. Miisaaniyadda 2020 waxa ay mudnaan siinaysaa kobcinta adeegyada caafimaad si waafaqsan Qorshaha Horumarinta Qaranka II iyo Fogaan-eegga Qaranka ee 2030. Waxa loo qoondeeyey caafimaadka SlShs 96.5 bilyan oo u dhiganta korodhsiimo ah 7% marka loo eego qoondadii miisaaniyaddii 2019.

Tallaabooyinka u qorshaysan in la fuliyo, wax aka mid ah:

• Kordhinta dakhtarro guud iyo kuwo xirfado gaar ah lehba

• Dhismaha 3 goob-caafimaad (2 Hargeysa ah & Oog ah), iyo 9 xarumaha hooyada iyo dhallaanka ah oo gobollada ah

• Kor-u-qaadidda ama dib-u-habaynta saddex goob-caafimaad oo ku kala yaalla Buuhoodle, Badhan iyo Balligubadle iyo 2 xarumaha hooyada iyo dhallaanka ah oo ku kala yaalla Arabsiyo iyo garbo-dadar

• Iibka 9 ambalaas iyo qalabka caafimaadka oo ay ku jiraan mishiinka kelyaha sifeeya oo cusbatalka Boorame ah

• In taageero dhaqaale oo dheeraad ah la taarto takhaatiirta iyo kalkaalisooyinka 7 cusbatal oo qaaxada ah (TB Hospitals) oo ku kala yaalla gobollada

Dawladdu waxa kale oo ay qaadanaysaa qoondada ay ku leedahay mashaariicda caafimaad ee ka socda Ceerigaabo iyo Laascaanood ee laga taageero Sanduuqa Horumarinta Somaliland (Somaliland Development Fund – SDF).

WAXBARASHADA

Muwaadin waxbarashada ka dhisani waxa uu u yahay lafdhabar Qaran waxsoosaar leh oo barwaaqo-u-jeed ah. Miisaaniyadda 2020 waxa ay siisanaysaa mudnaanta ay leedahay helitaanka adeegyada waxbarasho oo la sii horumariyo. Waxa uga qoondaysan miisaaniyadda waxbarashada SlShs 196.9 oo u dhiganta in 31% kor looga soo qaaday qoondadii 2019.

Korodhsiimadan waxa lagu maalgelinayaa:

- Korodhsiimada mushaharka macxallimiinta dugsiyada hoose/dhexe qader dhan 25% iyo qoritaanka 300 oo macallin oo cusub.
- Kor-u-qaadidda tayada xarumaha tababarrada macallimiinta
- Dhismaha 6 dugsi iyo 3 maktabadood oo gobollada ah

Waxa dawladdu qaadanaysaa mas'uuliyadda qoondada ay ku leedahay mashaariicda horumarinta waxbarashada ee Dayaxa iyo Laascaanood oo uu taageero Sanduuqa Horumarinta Somaliland (SDF).

BIYAHA IYO FAYODHAWRKA

Helitaanka biyo nadiif ahi waxa uu muhim u yahay caafimaadka iyo fayoqabka muwaadiniinta Somaliland. Miisaaniyadda 2020 waxa ay diiradda saari doontaa biya-yaraanta dalka ka jirta.
SlShs 28.8 bilyan ayaa loo qoondeeyey biyaha, fayadhawrka oo la mid ah in 64% korodhsiimo ah lagu sameeyey qoondadii 2019.



Hawlaha muhimka ee qorshaysan wax aka mid ah:

- Dhismaha laba dhaam oo waaweyn
- In Oodwayne, Maroodi iyo Awdal laga kala dhiso 3 dhaam, iyo saddex warood oo laga kala dhisayo Sool, Sanaag iyo Saaxil
- Laba ceel oo laga qodo Kulaal aiyo FiqiFuliye, iyo iibka riig

DEEGAANKA

Ilaalinta deegaanka iyo duurjoogtu waxa ay kaalin daruuri ah u leeyihiin faca manta jooga iyo kan soo socdaba. Waxa uga qoondaysan deegaanka SlShs 25.4 bilyan Miisaaniyadda sannadka 2020, oo u dhiganta in 8% lagu kordhiyey qoondadii 2019.

Hawlaha horumarineed ee qaybtan u qorshaysan, wax aka mid ah:

- Dhir-beerid
- Ilaalinta duur-joogta
- Kordhinta ilaalada deegaanka iyo kaymaha
- Samaynta Seere u gaar ah duurjoogta oo laga hirgeliyo Bancawl iyo Cashuura
- Ka hor tagga masiibooyinka dabiiciga ah.

KAABAYAASHA

Kaabayaal la isku hallyn karo, haddii ay noqon lahayd jidadka iyo haddii ay ahaan lahayd tiknoolajiyadda xogta iyo isgaadhsiintaba, waxa ay xidhiidhayaan muwaadiniinta, waxana ay wax weyn ka taraan koboca dhaqaalaha. Miisaaniyadda qaranka ee 2020, waxa ay mudnaan siimneysaa horumarinta kaabayaasha aas-aasiga ah. Waxa u qoondaysan SlShs 91.3 bilyan oo la mid ah in kor looga soo kacay qoondadii qaybta ugu jirtey miisaaniyaddii 2019 8.5%.

Mashaariicda u qorshaysan wax aka mid ah:

• Hawsha ka socoto mashruuca horumarinta waddada Ceerigaabo iyo tan Oodweyne-Burco iyo, weliba, buun-dooyin ama biriijyo u qorshaysan waddada Ceerigaabo.

• Hirgelinta dawlad ku wada shaqaysa tiknoolajiyadda Elektaroonika (e-Government)

• Samaynta xarumo tiknoolajiyadda xogta iyo xidhiidh-ka ah (ICT centres)

• Taageeridda isu-furka ama wadahadalka shirkadaha is-gaadhsiinta

• Iibka taag dekedda Berbera si loo kordhiyo kartida waxqabad ee marsada

WAXSOOSAARKA

Dhaqaalaha Somaliland waxa ka bannaan fursado badan oo kobcineed. Mi-isaaniyadda 2020 waxa ay mudnaan siinaysaa xoojinta waxsoosaarka, gaar ahaan, beeraha, xoolaha, iyo kalluumaysiga. Waxa Miisaaniyaddu uga qoon-daysay qaybtan SlShs 54.25 bilyan oo muujinaysa in kor looga soo qaaday halkii 2019 qader dhan 16.9%.

Meelaha bartilmaameedka u ah horumarinta qaybtan, wax aka mid ah:

• Mashaariic beereed oo ku kala yaalla Beer, Wajaale iyo Oodweyne si looga beero galley, hadhuudh, sisin iyo khudaar kale.

• Shinni-abuur si beeralydu ay u helaan siidhka ama shinnida ugu tayada badan

• Fidinta beeraha si ay u kordhiyaan beeraleydu waxsoosaarka dalagga

• Ilaalinta abuurka ama dalagga si looga hortago cayayaanka waxyeellada u leh

• Beeraha lagu dhaqo xookaha si loo koriyo aqoonta waxsoosaarka xoolaha iyo tarankooda, iyo, weliba, tallaalkooda iyo naaxintooda oo laga hirgelinayo Aroori iyo Qoolcaday.

• Mashruuc dib-xoolayn ah si waxlooga qabto waxyeelladii iyo caydhayntii ay kaga tagtay reer guuraaga abaartii 2017 taas oo loogu talo galay in 500 oo qoys midkiiba la siiyo kaalmo dhan 20 neef oo isugu jira ido iyo riyo.

• Dhismaha xarumo kalluumaysi iyo qaboojiyeyaal

• Iibka doonyo kalluumaysi oo mid ka mid ah Jaamacadda Kalluumaysiga Berbera loogu talo galay, inta kale iyo qalabkoodana loo qaybin doono kalluumaysatada yaryar.

MEELAHA MUDNAANTA KOWAAD DAWLADDU SIINAYSO

HORUMARINTA DHALLINYARDA IYO SHAQO-ABUURKA

Hantida u qaalisan ee Jamhuuriyadda Somaliland leedahay waxa ka mid ah da'yarta iyo bulshadeeda hibada leh. Waxa mudnaan sare u leh dawladda in dhallinyarada la siiyo fursado ay wax ku soo kordhin karaan kobcinta dhaqaalaha dalka.

Miisaaniyadda 2020, waxa ku jira mashaariic bartilmaameedsanaya horumarinta da'yarta iyo shaqo-abuurka, sida:

- Shaqo-qoridda 2000 oo Shaqada Qaranka ah
- Ku kordhinta Sanduuqa Horumarinta Da'yarta Sl.Shs 2 bilyan
- Ballaadhinta iyo tayaynta xarumaha shaqo-abuurka
- Dhismaha garoomo kubbada cagta ah oo laga hirgelinayo Caynaba, Oodweyne iyo Balligubadle iyo dhammaystirka garoonka Ceerigaabo iyo Laascaanood.

DHUL U GAAR AH WARSHADAHA (INDUSTRIAL ZONE)

- Abuuridda dhul u gaar ah warshadaha iyo warshadaynta si loo dhimo kharaska dhul-iibsiga iyo dhimidda kharashka abyidda warshado cusub

AQOONSIGA

Jamhuuriyadda Somaliland waxa ay dedaal ugu jirta inay caalamka ka hesho ictiraaf diblumaasiyadeed oo buuxa. Waxa loo suntay yoolkaa SlSha 23 bilyan si looga midho-dhaliyo.

DOORASHOOYINKA

Waxa dawladda ka go'an in la helo doorashooyin xaq iyo xalaal u dhaca. Miisaaniyadda 2020 waxa ay u qoondaysay Sl.Shs 28 bilyan u-diyaar-garowga hawshaa.

WAA MAXAY SIYAASADDA CASHUURAHA EE DAWALADDA EE LAGU ABAABULAYO KHAYRAADKA/DAKHLIGA SANNADKA 2020?

Dawladda waxa ka go'an inay yarayso ku-tiirsanaanta cashuuraha wax-soo-dejinta iyo wax-dhoofinta, iyo fiiyada yaryar ee dul-xaadiska ah. Sii-wadidda kordhinta cashuuraha iyo qaraamada yaryari ma aha mid la joogtayn karo iyada oo qiimahu ku sii kordhayo uun muwaadiniinta reer Somaliland. Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda waxa u qorshaysan inay qaaddo tallaabooyin dhawr ah sannadka 2020 si loo kordhiyo mugga dakhliga ka soo hayda cashuuraha aasaasiga ah.

Cashuuraha aasaasiga ah wax aka mid ah:

Cashuuraha aasaasiga ah wax aka mid ah:

Cashuuraha Gudaha ee Aasaasiga ah	Maxaa la Cashuurayaa	Xaddiga/Heerka Cashuurta
Cashuurta Dakhliga Ganacsiga	Dakhliga la cashuuri karo: Waxa loola jeedaa faa'iidada guud oo lagu daray dakhliga ka soo hoyda hantida, maalgelin ama ilo kale oo laga jaray khasaaraha iyo kharashaadka	Sannadla 10%
Cashuurta Dakhliga Shaqaalaha (cashuurta mushahaarooyinka)	Dakhliga ka soo gala shaqaalenimada oo ay ku jirto mushahaarooyinka	Bille, 6%
Cashuurta agabka iyo adeegyada (GST)	Agab ama adeg (sida agab la warshadeeyey, la soo dejiyey, bixinta koronta, isgaadhsiinta, hudheellada la seexdo iyo kuwa wax laga cuno, safarrada caalamiga ah iyo adeegyada safarrada	5%
Cashuurta Dakhliga Kirooyinka	Dakhliga kirooyinka hantida rigliga ah ee aan dhaqaaqin	Sannadle 10%

Horumarin iyo dib-u-qaabayn ayaa lagu samayn doonaa maamulka cashuurahan sannadka 2020. Waxa ahmiyad gaar ah la siin doonaa sidii loo ururin lahaa cashuuraha dakhliga ganacsiga si daahfuran, caddaalad ah oo karti leh. Halka laga kordhin lahaa cashuuraha ganacsiga, dawladdu waxa ay maalgelin ku samaynaysaa kastammada si loo sugo ammaankooda, kartidooda iyo hufnaanta u-adeeggooda ganacsiga soo gelaya am aka baxaya Somaliland.

Wasaaradda Horumarinta Maaliyaddu waxa ay isku hawlaysaa ku-wargelinta cashuur-bixiyaha iyo ganacsatada xuquuqdooda iyo waajibaadkoodaba, waxana ay kala tashanaysaaa isbeddellada ku imanaya cashuuraha iyo kastammada.

SIDEE SI KA SII WANAAGSAN LOOGU MAAREEYAA MAALIYADDA DAWLADDA?

Si ceeb la' oo loo maareeyo maaliyadda dawladdu waxa uu door halbowle ah ku leeyahay hirgelinta meelaha mudnaanta ay siisay miisaaniyaddu. Si loo taageero aragtidan, waxa Wasaaradda Horumarinta Maaliyaddu daahfuraysaa Nidaamka Maaraynta Xogta Maaliyadeed ee Somaliland (Somaliland Financial Management Information System) oo laga hirgelin doono hay'adaha dawladda oo dhan si ay ula socdaan ugana warbixin karaan miisaaniyadahooda. Tijaabooyin lagu guulaystay ka dib, musharasiinta shaqaalaha ayaa isaguna noqon doona mid ka karti badan oo ka hufan kan hadda iyada oo si iyadu iswadda (automated) loo bixin doono sannadka 2020.

Somaliland waxa ay u baahan tahay inay ahaato mid diyaar u ah lama-fillaannada taban sida abaaraha iyo duufaannada. Dawladdu waxa ay diyaarinaysaa sanduuq lama-fillaannada lagu maareeyo, iyada oo lagu bilaabayo SlShs 5 bilyan. Waxa lagu dari doonaa 1% oo ah wadarta miisaaniyadda ee guud sannadaha ka dambeeya oo dhan.

HIRGELINTA CASHUURAHA IIBKA LA SOCDA

Cashuuraha iibka la socdaa ee xakamayntu waxa ay ku waajibaan agabka la warshadeeyo, kan la soo dejiyo ee aan daruuriga ahayn iyo agabka waxtarkiisu yaryahay ama taban yahay. Cashuurahan ayaa raaci doona qiimaha cashuurta lagu bixiyey ee agabka la soo dejiyey ee halkan ku qeexan laga bilaabo 1da January 2020. Waxa xusid mudan in heerarka cashuurta ee la soo jeediyey uu hadda ka yar yahay kan ku xusan Xeerka Dakhliga iyada oo sannadaha dambe si tartiib ah loo kordhin doono iyada oo lagala tashanayo daneeyayaasha ay khusayso.

Agabka la Cahuurayo	**Heerka Cashuurta**
Tubaakada iyo wixii la hal maala oo ay ku jiraan Sigaarka duubaan, sigaarka caadiga ah, Tubaakada la cabbo iyo tan la calashadoba	**5%**
Agabka la isku qurxiyo ee ay ka midka yihiin cadarrada, indha-kuusha, xamuuradaha, iwm.	5%
Cabitaanka aan aalkolada lahayn ee ay ka midka yihiin sharaabka khudradda iyo khudaarta laga sameeyo, cabbitaanka tamarta, kuwa soodhaha leh iyo kuwa heedda leh	10
Baabuurta raaxada, oo loola jeedo gaadiidka sida gaarka ah loo leeyahay oo awoodda hinjiinkiisu gaadhayo 4000cc am aka badan, qiimihiisuna gaadhayo US$20,000 ama ka badan	10%
Dahabka, Maarta, Macdanta iyo Saacadaha	10%

SARGOYNTA HEERKA SARRIFKA LACAGAHA QALAAD

Dawladdu waxa ay ka kordhineysaa heerla sarrifka lagu cashuuro qaadka la soo geliyo waddanka Sl.Shs 6,000 iyada oo laga dhigi doono SlShs 7,000 halkii Doolar ee Maraykan ah si loola simo heerka sarrif ee agabka kale ee la soo dejiyo lagu dhaqo.

CASHUURAHA OO LAGA DHIGO KUWO SI SAHLAN LOO BIXIN KARO

Wasaaradda Horumarinta Maaliyaddu waxa ay bartilmaameedsanaysaa sannadka 2020 inay cashuur bixiyaha u fududayso diiwaangelinta iyo bixinta cashuuraha. Waxa gacanta lagu hayaa nadaam cashuur-bixiyuhu moobilki-isa ama nidaam kale oo elektarooniko ah uu ku bixin karo cashuurta isaga oo adeegsanaya Lambarka Aqoonsiga Cashuur-bixiyaha (Taxpayer Identification Number). Waxa kale oo Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda yool u ah sannadka 2020 inaan cashuur bixiyaha la saarin cashuuro iyo adeegyo ka baxsan sharciyadda.

Meelo badan ayaa durba horumar laga sameeyey: in cashuur-bixiyuhu isagu cabbiri karo cashuurta ku waajibtey, sida mushahaarooyinka, agabka iyo adeegyada iyo cashuurta dakhliga - taas oo u sahlaysa inuu xereeyo wixii ku waajibay. Cashuur-bixiyuhu, waxa kale oo u fududaanaysa inuu caddeeyo agabka u soo degey. Wasaaraddu waxa kale oo ay dejisey oo daabacday shuruuc hagaya cashuur-bixiyaha iyo ganacsatada.

Cashuur-bixiyaha ku diiwaan gashan Lambarka Aqoonsiga Cashuurbixiyuhu waxa uu heli doonaa adeegyo dheeraad ah, la talin iyo taageero. Meheraduhu waxa ay u baahan doonaan Lambarka Aqoonsiga si ay u helaan caddayn cashuur-bixineed ama u gudbiyaan qandaraas dawladda ay ka rabaan ama loo siiyo kharash ay kaga yeesheen dawladda agab ay ka iibiyeen ama adeeg ay u qabteen, si ay u cusboonaysiiyaan ruqsadahooda ama si ay uga soo dejiyaan ama uga dhoofiyaan agab Somaliland.

Wixii su'aalo ama toyasho ah ee la xidhiidha sida cashuur-bixiuhu u noqdo mid ku quman oo la jaanqaada na-daamka, waxa la sameeyey lambar xilli walba furan oo ah 3535; haddii kale waxa cashuur-bixiyuhu soo booqan karaa xafiiska taagerada xogta iyo caawimada arrimaha la xidhiidha cashuuraha oo laga heli karo degellada Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda.

Email: info@slmof.org
Phone: +252 63 4245411

Tilmaan:
Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda,
Waddada Madaxtooyada, Hargeisa
Hargeysa, Jamhuuriyadda Somaliland